# Shuruudaha heshiiska macaamilka ee waxqabadka kooraska adeegyada jimicsiga

Laanta shaqada iyo dhaqanka iyo wakhtiyada firaaqada/Adeegyada jimicsiga

Paavo Nurmen kuja 1 C

SB 25400, 00099 Magaalada Helsinki

tel. (09) 310 1060 (sii gudbin)

Helsinki

## Shuruudaha heshiiska macaamilka ee waxqabadka kooraska adeegyada jimicsiga

### 1. Warbixin guud

Shuruudaha heshiiska macaamilka ee waxqabadka kooraska adeegyada jimicsiga waxaa lagu dabaqayaa nidaamyada la xiriira koorasyada jimicsiga la hago ee ay qabanqaabiso magaalada Helsinki qeybteeda adeegyada jimicsiga dhaqanka/wakhtiyada firaaqada. Adeegyada dhaqanka, iyo wakhtiyada firaaqada/jimicsiga ee magaalada Helsinki wuxuu bixiyaa adeegyo jimicsi wuxuuna mas'uul ka yahay waafajinta sharciga ee waxyaabaha uu adeegoodu ka kooban yahay. Adeegyada jimicsigu waxey xaq u leeyihiin in ay beddelaan adeegyada ay bixiyaan ama waxyaabaha ku jira adeegyada. Adeegyada jimicisigu mas'uul kama ahan adeegga adeeg bixiyaha ama waxyaabaha uu adeeggu ka kooban yahay xittaa marka adeeggan lagu geli karo tusaale ahaan linkiga adeegyada jimicsiga elekterikaalka ah  ama qaab kalaba. Adeegyada jimicsigu mas'uul kama ahan qasaaraha laga yaabo in ay macaamilka ka soo gaarto isticmaaalka macluumaad khaldan, aan dhammaystirnayn ama siyaabo kala duduwan loo fasiran karo ee adeegga ku jira. Adeegyada jimicsigu waxey mas'uul ka yihiin oo kaliya saxnimada, tayada iyo shaqeynta alaabta ay iibiyaan iyo adeegyada ay bixiyaan.

### 2. Adeegyada elekterikaalka ah- adeegga dan qabsashada

### 2.1 Aqoonsashada iyo isdiiwaangelinta

Istimcaalka adeegga wuxuu ku xiran yahay in la jiro da'da 18 sano ama la heysto ogolaanshaha dano ilaaliyaha ama mas'uulka. Marka uu isticmaalayo macaamilku adeegyada jimicisga elekterikaalka ah ee adeegga dan qabsashada wuxuu aqbalaya shuruurdaha heshiiska macaamiisha waxqabadka kooraska jimicsiga la hago iyo weliba shuruudaha isticmaalka adeegyada jimicsiga iyo adeegga dan qabsashada ee elekterikaalka ah.

Adeegga dan qabsashada ee elekterikaalka ah waxaa ku jira macluumaad shakhsi ah, sidaas darteed ka baaraandegistoodu waxey u baahan tahay aqoonsasho ka hor isticmaalka adeegga. Sugitaanka ama aqoonsashada adeegga dan qabsashada ee elekterikaalka ah waxaa lagu hirgeliyay sugitaanka VETUMA, halkaas oo uu isticmaaluhu isku caddeynayo aqoonsadayaasha gaarka ah ee bangiga, caddeynta moobaylka ama aqoonsiga Fiiri ee shirkadaha ama ururada.

Isticmaalista koowaad marka aad ku jirto ayaa waxaa lagaa codsanayaa in aad isdiiwaangeliso. Isdiiwaangelinta kaddib waxaad heleysaa gal dan qabsasho oo aad adigu leedahay.

### 2.2 Ilaalinta macluumaadka

Macluumaadyada la ururinayo inta lagu jiro waxqabadka koorasyada ee adeegyada jimicsiga waxey ku jiraan diiwaanka macaamilka ee adeegyada jimicsiga. Warbixinta diiwaanka iyo wararka kale ee ku saabsan xuquuqda ilaalinta macluumaadka waxaa laga helaaa bogagga shabakadda xafiiska magaalada Helsinki.

Helsinki

### 2.3 Habboonaanta isticmaalka ee adeegga

Adeegga jimicsigu mas'uul kama ahan joogsi la'aanta adeegga, wakhtiga ku habboon iyo weliba waxqabadka khalad la'aanta ah. Adeegga jimicsigu mas'uul kama ahan dhibaatooyinka farsamo ee laga yaabo in ay ka soo baxaan adeegga, hakad ku yimaada farsamada ama hawlaha rakibaadda ama lumista ama isbeddelista waxyaabo adeegga ku jiray ama macluumaad ay iyagu sababeen iyo weliba dhibaatada gudbinta macluumaadka, cillad ama hakad ay sababtay qeyb saddexaad iyo weliba sidoo kale qasaaraha ay kuwaasi sababaan. Adeegyada jimicsigu xaq ayeey u leeyihiin dhex ku joojinta adeegga beddelistiisa, cusbooneysiintiisa ama sababo farsamo oo adeegga la xiriiro dartood ama dayactirka shabakadda war-isgaarsiinta, rakibaadda ama hawlaha farsamada amaba sabab kale oo kuwaas lamid ah darteed ama haddii sidaas lagu doonayo sharci degsan ama amar dowladeed.  Adeegga jimicsigu wuxuu ku xadeynaa dhex ku joojinnada in ay noqdaan kuwa wakhti gaaban qaata. Dhex ku joojinnada waxaa warkooda horay loogu soo gudbinayaa sida ugu macquulsan.

### 2.4 Xuquuqda

Dhammaan xuquuqaha adeegyada jimicsiga elekterikaalka ah iyo adeegga dan qabsashada waxaa iska leh adeegga jimicsiga ama kuwa kale ee soo saara waxyaabaha ku jira adeegga ama kuwa ruqsada u heysta. Soosaaraha adeeggu wuxuu xaq u leeyahay in uu joojiyo markii uu doono soosaarista adeegyada jimicsiga elekterikaalka ah- adeegga dan qabsashada. Arrintan waxaa lagu soo gudbinayaa bogagga shabakadaha ee adeegyada jimicsiga (www.hel.fi/liikunta) wakhti hore oo ka horeeya inta aan soosaarista adeegga la joojin. Soosaarista adeegga jimicsiyada elekterikaalka ah- adeegga dan qabsashada waxaa mas'uul ka ah Enkora Oy Ltd.

### 2.5 Xaqa macaamilka ee isticmaalka adeegga

Macaamilku wuxuu si waafaqsan shuruudaha isticmaalka ee adeegga jimicsiga elekterikaalka ah – adeegga dan qabsashada u helayaa xaqa isticmaalkooda marka uu kuwaan shuruudahooda ama shuruudaha kale ee laga yaabo in ay adeeg u gaar yihiin.  Macaamilku wuu ogyahay in inkastoo laga yaabo in adeegga laga sii geli karo adeegyada soosaarayaal kale ay isticmaalka adeegyadaas u baahan karaan isdiiwaangelin gaar ah. Macluumaadyada rasmiga ah ee shuruudaha u goonida ah adeegyada ay bixiyaan adeegyada jimicsigu, xadeymaha  ama adeegysiyada waxaa laga helaa bogagga shabakadda dhaqanka iyo wakhtiyada firaaqada/adeegyada jimicsiga www.hel.fi/liikunta.

### 2.6 Dhinacyada qaabilsan

Vetuma: Xarunta farsamada isgaarsiinta iyo macluumaadka ee dowladda. Valtori. Emaylka: vetuma(at)valtori.fi.

Soosaarista adeegga: IBM

Sugitaannada bangiga: Bangi kastaa waxa uu ka masuul yahay aqoonsashada iyo lacag bixinta

Soosaarista adeegga dan qabsashada elekterikaalka ah: Enkora Oy Ltd

Adeegga sugitaanka iyo lacag ku bixinta ee looga faa'iideysanayo adeegga dan qabsashada elekterikaalka ah: (Adeegyada jimicisiga) Dhaqanka iyo wakhtiyada ee magaalada Helsinki.

6.11.2018

## 3. Qiimaha

Qiimaha waxaa la socda canshuurta qiimaha la dulsaaro oo ah 10%.

## 4. Bixinta lacagta

Macaamilka ayaa mas'uul ka ah saxnimada macluumaadka uu bixiyay marka uu badeecada ku sii qabsanayo ama ku iibisanayay telefoonka ama adeegga dan qabsiga elekterikaalka ah ee adeegyada jimicsiga. Adeegga dan qabsiga elekterikaalka ah ee adeegyada jimicsiga waxyaabaha lagu sii qabsado waxaa lagu bixin karaa bangiyada shabakadda ee Nordea, Danskebank, Osuuspankki, Aktia Sp/Pop iyo Handelsbanken. Marka uu adeegga dan qabsashada elekterikaalka ah ee adeegyada jimicisga dhexiidsa isaga diiwaangelinayo kooraska jimicsiga iyo marka uu ku bixinayo lacagta ka qeybqaadashaba waa in uu macaamilku sii qabsashadiisa ku xaqiijiyaa in uu shabakadda bangiga dib uga laabto isagoo ku laabanaya adeegga dan qabsiga elekterikaalka ah ee adeegyada jimicsiga. Macaamilka ayaa mas'uul ka ah bixinta lacagta sii qabsashada iyo ku laabashada adeegga. Adeegyada jimicsigu mas'uul kama ahan cilladda lacagta bixinta ama baaqashada sii qabsashada ka dhalata ku laabasho la'aanta adeegga dan qabsashada elekterikaalka ah bixinta lacagta kaddib. Goobaha qaarkood isticmaalka adeegyada jimicsigu waxey u baahan tahay in macaamilku uu heysto kaarka shakhsiga ah ee macaamiisha oo qiimihiisu yahay 4 yuuro. Marka uu bixinayo badeecada uu doortay ayaa waxaa macaamilka iyo magaalada Helsinki ka dhex-dhalanaya heshiis waajib ah. Sii qabsashada booksu wuxuu shaqeynayaa wakhtiga foomka lagu calaamadeeyay oo kaliya.

## 5. Beddelista iyo ka laabashada badeedaca la gatay

Iska diiwaangelinta macaamilka ee koorasyada ay qabanqaabiyaan adeegyada jimicsigu wuxuu noqonayaa waajib. Haddii ay macaamilka qasab ku noqoto in uu ka laabto ka qeybqaadashada kooras ay qabanqaabiyeen adeegyada jimicsigu welina uusan lacagtiisa bixin, ka laabashada waa laga aqbalayaa, haddii uusan kooraska ka qeybqaadan ka laabashadana la sameeyay kahor maalinta ugu dambaysa bixinta biilka. Haddii ay macaamilka qasab ku noqoto in uu ka laabto ka qeybqaadashada kooras ay qabanqaabiyeen adeegyada jimicsigu kahor inta uusan billaaban balse uu lacagtiisa mar hore bixiyay, lacagta kooraska uu ku bixiyay waxaa lagu soo celinayaa oo kaliya haddii uu ka guuray degmada, jirraday ama ay dhimasho dhacday (wargelinta guuridda ama caddeynta dhakhtarka ayeeyna soo celinta lacagtu ku xiran tahay). Lacagta laba jibbaar ahaan loo bixiyay iyadoo dhammeystiran ayaa la soo celinayaa. Waxaa ka laabashada darteed laga goynayaa kharashka ka baaraandegista (8,50 e/halkii ka laabashaba). Ka maqnaanshiyaha koorasyo hal-hal ah ama wargelinta ka laabashada ee la sameeyay billaabashada kooraska kad dib wax magdhow ah lagama soo celinayo. Haddii sababaha kor lagu soo sheegay dartood la doonayo in laga laabto ama la beddelo sii qabsashada, waa in adeegga jimicsiga lagu soo wargeliyaa iyadoo la isticmaalayo emaylka liikuntakurssit@hel.fi ama tel 09) 310 87501.

## 6. Shuruudaha kale

Adeegyada jimicsigu waxey macluumaadka macaamiisha uga baaraandegayaan cinwaanka warbixinnada diiwaanka magaalada Helsinki/ Helsingfors stads registerbeskrivninga ee waafaqsan warbixinnada diiwaanka la akhrisan karo ee ku jira adeegyada jimicsiga. Warbixinta

diiwaanka ee adeegyada jimicsiga- adeegga dan qabsashada elekterikaalka ah waxaa laga helaa barta adeegyada jimicsiga  diiwaanka macaamiisha ee nidaamka kambuyuutarka Enkora.